MA DOORASHAA DANBI AH MISE TASDUUR? QEYBTII 1AAD.

Labadan erey waxay noqdeen kuwa la shareysto gaar ahaan kooxaha diinta, ilaa gaarkood ku tilmaamay gaalnimo inkastoo ay kala culusyihiin, bal aan mid mid isu dutaagno si aan u ogaano waxay wadaadadu ka dideen iney magaca kaga dhagan tahay iyo iney macnaha tahay meesha sartu ka quruntay. Wadaaduhu waa qeyba badan oo kala duwan kalana danbeeyey saas darteed mar mar baan qaarkood laga yaabaa inaan tusaale u qaadanno gaar ahaan Al.Shabaab maadaama ay yihiin moodadii ugu danbeysey ee so baxday isla markaasna ugu xoogroon uguna mowqif adag.

DOORASHO

Doorasho: waa qaab go'aan qaadasho oo ay dadku ku doortaan ciddi u qaban lahayd xafiisyada dowladeed.
Doorashadu waa albaabka laga galo qasriga xukunka, dadkuna waa jidka loo maro aqalkaas iyagaana haya furihiisa ninkii aan tixgelin oo ka tillaabsada oo saas aqalka ku galana waa in dhac geystey. Shacabku iney wax doortaan waxay ka mid tahay xuquuqdooda asaasiga si ay isaga hubiyaan cidda xukumeysa iyo nooca ay tahay dowladoodu, waayo xukunku waa isafgarad dhexmara shacabka iyo madaxda kuna fadhiya raali ahaanshaha iyo rabitaanka labada dhinac wixii ay ku heshiiyaan baana dowlad ah.
Doorashadu ma aha nas towqiifi ah oo aan isbadelin sida salaada ee waa arrin u hogaansameysa had ba waaqica la joogo, duruufta lugu noolyahay iyo mar ba meesha ay maslaxadu gasho, waxaana saameynaya kororka iyo horu socodka aduunka maadaama uu Illaahey aadamaha marwalba barayo wax cusub. (ويخلق ما لا تعلمون)
Dadkuna iyagaa yaqaan sidey u maareyn lahaayeen arrrimohooda aduunyo sida uu sheegey Nabigu CSW. (أنتم أعلم بأمور دنياكم)
Tusaale, baahida caafimaad waxaa yaqaan bahda caafimaadka, baahida waxbarasho waxaa yaqaan bahda waxbarashada, sido kale baahida biyaha, korontada, beeraha,wadooyinka, nadaafada IWM.. Koox walba iyadaa taqaan baahideeda iyo sida lugu xallin karo shacabkuna intaas ayuu ka kooban yahay, marka talada dalku waxay dhextaal dhammaan qeybahaas iyo inta la mid ka ah, dowlad na waxaa loogu sameyn karaa in inta la diiwaan geliyo oo sanduuqyo loo dhigo ay doortaan qofkii anfacaya ka dibna cod dheeri lugu meel mariyo natiijada. taladuna noqoto wareegto waxaa xusid mudan in ereyga carabigaa ee dowla uu macnihiisu yahay wareegto taasoo ku tusi karta dowladnimo iney tahay meerto maalinba qof qabto ee aysan ahayn wax cidi gaar u yeelato, taasaana ah qaabka kaliya ee waqtigan dowlad lugu dhisi karo ayna dadka iyo dowladdu ku heshiin karaan. Waxaan ka hadleyno waa doorashada madaxda iyo hey'adaha dowladda ee ma aha dastuurka iyo qawaaniinta lugu dhaqmayo taas qeybta 2aad ban ku sheegi doonnaa insha allah..

Qur'aanku wuxuu ceebeeyey talisyada gacanta kulul iyo manaxayaasha dadka silciya wuxuuna u hiiliyey shucuubta dulman ee xaqoodii lugu tuntay.
Marku Islamku yimid, dunida waxaa ka jirey isduudsi iyo ninkii xooglaa xabagta goosta taladana waxaa lugu haystay xoog iyo dhaxal aabe dadkana waxaa adoonsan jirey dabaqada sare.

Islaamku wuxuu keeney talo wadaag iyo in dhammaan qeybaha bulshadu ka kooban tahay la mideeyo lagana dhigo walaalo siman, madaxda iyo shacabkuna ay noqdaan kuwa heshiis ah oo wada shaqeeya cadaaladuna astaan u tahay.
Nebigu CSW wuxuu aduunka ka tagey iyadoon muslimiintu madax lahayn waayo wuxuu doonayey iney iyagu isdoortaan kursiguna noqdo dhextaal mar ba qofkii u qalma loo dhiibo, weliba Nebigu CSW sida tilmaamo badan laga fahmayo wuxuu talada la rabey Abubakar hadana saxaabada kuma dhihin Abubakar doorta, faruhuu uga qaadey si go'aanka iyaga uga yimaado. Ka dib na saxaabadu inteysan Nebigii CSW aasin ayey guda galeen doorasho iyagoo aysan takniko kala wardiyeyneyn cidina u kala dabqaadeyn ayey shir isugu yimaadeen iyagoo weliba aad ugu kala aragti duwanaa cidda xukunka qabaneysaa hadana dood dheer oo xikmad iyo waaqic ku saleysan ka dib waxay isku raaceen in la doorto Abubakar RC.

Ma jirto intaan ogahay qaab gooni ah oo diintu u go'aamisey in wax loo doorto ee waxaa loo daayey dadku iney maamushaan danahooda noocyo iyo isbadello badan ayeyna soo martay ilaa laga soo gaaro qaabka hadda wax loo doorto, wadanka iyo waqtiga la joogo ayaana wax badan qayaxaya farsamooyinka la adeegsanayo, waxaana bud-dhig u ah wadatashi iyo isla ogolaansho taasoo ah saldhiga ugu weyn ee laga hago dowladnimada, (وأمرهم شوري بينهم)
Waxaana reeban boob iyo xukun dhac. (إغتصاب السلطة)
Wadatashigu waa waajib sharci ah oo aan la khilaafi Karin waxaana ku tusinaya meesha uu joogo in mid ka mid ah suuradaha Qur'aanka Kariimka ah lugu magacaabo suuratu shuuraa suuraddii wadatashiga. Sido kale Nebi dhowrsoon oo waxyi kusoo dagayo ayaa la amray inuu dadka la tashado waana farriin umadda loogu sheegayo muhiimadda ay leedahay tala wadaagistu.
Wixii ay muslimiintu ku heshiiyaan waa banaanyihiin hadii aysan shey diini ah dhaawacayn sida ku timid sunnada. (الصلح جائز بين المسلمين إلا صلحا أحل حراما أو حرم حلالا)
Markaan ka Hadleyno doorasho iyo wixii la mid ah waxaa laga fiirinayaa hal dhinac oo ah diinta makasoo horjeedaa iyo maslaxad ma ugu jirtaa dalka iyo dadka,qofkii diida ayaana laga rabaa cadeyn waayo isagaa ka horyimid asalkii ashyaada ee banaanaa. Dadyowga dunidu qaar ba si bey wax u doortaan maadaama ay ku kala duwanyihiin, dhaqan, diin iyo dan inta.
Hadda waxaan ka hadleyno waa shacabkeenna muslimka ah inuu wax doorto, qaabkii ay u gartaan in la isu doorto waxaa laga fiirinaya dhinacaan soo sheegney.

YAA WAX DOORANAYA?

Dabcan waxaa wax dooranaya muwaadinkasta oo sharcigu u ogol yahay inuu wax doorto. Waxaa jira qeybo buuq badan laga keeno iney wax dooran karaan sida da'yarta iyo dumarka ila fiiri akhriste tusaalayaashaan.

Dhallinyarada: Nebigu CSW beycada caqabadi 2aad wuxuu la galay dhallinyaro, marka xaq bey u leeyihiin beycada ama doorashada waa hadey qaan gaar yihiin, saas darteed ayuu Nebigu CSW da'yarta dooneysa iney dagaalka gasho wuxuu ka fiirin jirey astaamaha qaan gaar nimada si uu u hubiyo iney qaan gaareen markaasu u fasixi jirey hadii kalena wuu u diidi jirey si xuquuqda caruurta loo ilaaliyo, sido kale Nebigu CSW

Osaama bin Zeyd oo 18 jir ah ayuu madax uga dhigey ciidankii xoogga badnaa iyadoo ay joogeen saxaabadii waa weyneyd. (أما صفة جمهور الناخبين فلا بد أن يتصفوا بالبلوغ في السن والرشد في الفكر)

Marka mudakar muslim ah xaq buu u leeyahay inuu ka taliyo masiirka wadankiisa sidey reer Mudug dhahaan “Gaashaan qaad ma habaabo”

Dumarka: Nebigu CSW wuxuu beyca la galay dumarka sida ku sugan Qur’aanka iyo sunnada. (يأيها النبي إدا جائك المؤمنات يبايعنك.)سورة الممتحنة, و حديث عائشة قالت "كان النبي صلي الله عليه وسلم يبايع النساء بالكلام." .

Sido kale doorashadii Cusmaan bin Caffaan waxaa ka qeyb galay dadweynihii degenaa magaalada Madiina C/raxmaan bin Cawf oo daarashada maamulayey wuxuu dadka soo weydiiyey Cusmaan iyo Cali kii ay dooranayaan. (وكان يشاور كل من يلقاه في المدينة من كبار الصحابة وأشرافهم و من أمراء الأجناد ومن يأتي للمدينة وشملت مشاوراته النساء في خدورهن وقد أبدين رأيهن كما شملت الصبيان والعبيد في المدينة, وكانت نتيجة مشاورات عبدالرحمن بن عوف أن معظم المسلمين كانوا يشيرون بعثمان بن عفان ومنهم من كان يشير بعلي بن أبي طالب رضي الله عنهم.) سيرة أمير المؤمنين عثمان بن عفان للدكتور محمد علي الصلابي.

Ka dibna C/raxmaan bin Cawf RC masaajidku shir isugu yeerey dadkii halkaasoo uu ku iclaamiyey natiijadii kama danbeysta ahayd ee ka soo baxday doorashadii. (فلما اجتمعوا تشهد عبدالرحمن ثم قال أما, يا علي إني نظرت في أمر الناس فلم اراهم يعدلون أحداً بعثمان فلا تجعلن علي نفسك سبيلاً, فقال أبايعك علي سنة الله ورسوله والخليفتين من بعده.) نفس المصدر.

Waxaan filayaa inaan fahaney doorka ay dadweynuhu ku lahaayeen noolashii Nebiga CSW iyo saxaabada RC.

Dhaqankaas ku saleysan hufnaanta iyo daacadnimada waa midka saxaabada ka dhigey xidigo aduunka tusaale u noqda. Xilliga ay saxaabadu saas u dhaqmayeen dunida lagama aqoon doorasho, xorriyatul qawl iyo xuquuqul insaan midna mana jirin baaqa caalamigaa ee xuquuqul insaanku, muslimiintu uma baahna iney ku daydaan mareykan iyo ingiriis ee waxay u baahan yihiin in si dhab ah loo baro taariikhdii saxaabada. Markaad aragtid doodii saxaabada ku dhexmartay saqiifatu banii saacida iyo qaabkey u dhacday doorashadii Cusmaan waxaad dareymeysaa meesha ay gaartey cadaalada iyo ilbaxnimada ay ku dhaqmayeen iyo sidey shey walba xaqiiisa u siinayeen xilli ay dunidu la gubaneysey dulmi iyo dib u dhac, halka wadaadadeennu intey indhaha xirtaan ay dadka u dhaartaan. Khulafadii waxay ahaayeen kuwa dadka la nool oo wax la cuna halka amiiradeenna ay aragtidoodu danbi tahay, waxaan is leeyahay arrintu kuma haboona aan ku xukumo imana arki kartid.

Dadka waxaa dowlad u noqon karaa mid ay iyagu doorteen, yaqaanaan qofka xukuma iyo siyaasada uu ku shaqeeyo si ay baahidooda ugu sheegan karaan, lkn nin dhowr magac leh muuqaalkiisana aysan aqoon dhowrkii bilood ba mar cajilad so dira wey adag tahay iney isla jaan qaadaan ama ay kalsooni siiyaan.

Xukunka in xoog lugu qabsado waa ku xaaraan Shareecada Islaamka, marka waxaa wanaagsanaan lahayd wadaadada dadka diinta ku xukuma sey sheeganayaan iney iyagu marka hore xukunka ku yimaadaan qaab diinta waafaqsan ka dib na dadka ku xukumaan. (الشرعية قبل الشريعة)

Waxaan u baahanahay inaan kala soocno waxyiga iyo dhacdooyinka taariikhigaa., oo dhacdo taariikh ah ama kifir sheikh aynaan ka dhigin nas sharci ah, ama aynaan doorashada ula dhaqmin sidii caqiido ama arrin kufri iyo Islaam u dhaxeysaa!! Kaliya arrintu waa hebel iyo hebel kala dooro kii madaxweyne noqon lahaa.

Waxaa jira aragti oraneysaa faasiq xaq uma laha inuu wax doorto aragtidaas sax ma aha waayo codku waa hantii uu qofku leeyahay sida hantidiisa kale ayuuna ugu tasarufaya qofkana waa faasiq mulkiyadiisu ugama wareegto, codbixintuna lama mid aha markhaatiga maxkamada iyo warinta akhbaarta isku shuruud na ma aha.
Mida kale yaa xadadaya faasiqa magac bixintaan hadda noqotay nolol maalmeedka? Faasiqu bulshaduu ka mid yahay isagaana xoolihiisa iska leh cidduu rabuuna siinayaa, wadaadka dilka ama dhaca geystey ama xukunka boobay waxa isaga faasiq nimada ka badbaadiyey shacabkana ku sumaday waa su'aal facweyn. Mida kale haddii ba laga yaabo in kooxa qaar ay Soomaalidoo dhan u arkaan faasiqiin ama gaalo hal beegee wax lugu miisaamayaa?

Magaca ahlu xalli walcaqdi oo loola jeedo waxgarad ee kutubta fiqiga kusoo aroorey iney iyagu wax dooranayaan. Nusuusta kuma cadda shaqadooda iyo cidda ay ka kooban yihiin fuqahada qaar waxay ku sheegeen, culimada, odoyaasha iyo kooxaha awooda leh, qaar na waxay ku fasireen golaha shuurada, ama golaha shacabka iyo barlamaanka waxa hadda loo yaqaan, dhammaan waa dadaal iyo ijtihaad. Shaki kuma jiro iney yihiin indhihii bulshada iyo kuwa ugu mudan talada laakiin arrimahaan baa u baahan in la fiiriyo.

1:Waxaa sameysmey waqtigan kooxo aan kuwaas ahayn hadana kaba awood badan sida, ururada bulshada rayidka ah, ururada shaqaalaha, xisbiyada siyaasdeed, saxaafada iyo ganacsatada.
2:Qaabkaan hada wax loo doorto oo inta safaf la galo sanduuqyo lugu codeeyo waa arrin la socota isbadelka aduunka ku dhacaya oo saameyneysa in badan oo ka mid heerarka nolosha iyo arrimaha bulshada kamana foga sameynta jaamacadaha ama baasaboorada iyo waraaqaha aqoonsi ee lugu safro taasoo aan horey loo aqoon waana meelaha ay ku kala duwan yihiin dowladii horey iyo tan xilligan jirta. (ثم هنالك تحول نوعي في عالمنا المعاصر وهو تحول الدولة من دولة بسيطة التركيب الي دولة مركبة ومتشابكة وشمولية تتدخل في كل صغيرة وكبيرة من حياتنا فإذا كانت الدولة غير شرعية فإن كل المجتمع سيسير علي خطي غير شرعية وإذا كانت الدولة تسير علي الظلم فإن كل المجتمع سينتشر فيه الظلم, الدولة القديمة كانت فسيحة الأرجاء لكنها كانت ضعيفة السلطة علي مواطنيها, والدولة المعاصرة مهما كانت صغيرة فهي دولة شمولية تطئ بكلكلها علي مواطنيها تتدخل في نظام التعليم وفي نظام القيم و نظام الإقتصاد الصادرات و الواردات في أرزاق الناس في أخلاقهم وفي كل شيء, فمفتاح إصلاح المجتمعات المعاصرة هو إصلاح النظام السياسي, بينما الدولة القديمة كان يمكن أن يصلح المجتمع مع فساد الدولة لأنها لم تكن دات وطؤة شديدة علي المجتمع هده الخلفيات ينبغي أن نأخدها كلها في عين الإعتبار) د.المختار الشنقيطي
3:Culimadu qaar waxay ahlu xalli walcaqdi ku dareen kooxaha xooga leh xataa hadey mooryaan yihiin iyago cuskanaya in lala tashado si looga nabadgalo sharkooda, maanta aduunkan aan joogno haddii aan shacabka lala tashan ama talada wax laga siin awood ma u leeyahay inuu dhibaato geysto waxaa ka jawaabaya waaqica horteenna yaal oo ah inuu shacabku awoodo inuu burburiyo wadanka dhan hadaan la dhageysan
4:Doorashada dadweynuhu waxay u muuqataa iyadoo oo la ballaariyey oo meeshii ay awal dad kooban wax dooran jireen ayaa tiradii la badiyey, mana jirto mabaadii isbadeshey ama isdiidan.
5: Horey waxaan usoo sheegney in doorashadii Cusmaan ay ka qeyb galeen dadweynuhu saas darteed ayey culimada qaarkood qabaan in doorashada shacabku ay tahay asalkii oo loo noqday. (أولاً هو تحول صحيح وهو تطور لما كنا عليه الي وقت قريب وخلال قرون لكنه في الحقيقة رجوع

الي الأصل, والأصل في الحكم أنه وكالة عن الأمة وهده الوكالة يعقدها أهل الحل والعقد أو للأمة أن تعقدها مباشرة.)
د.أحمد الريسوني, خبير في مجمع الفقه الإسلامي الدولي
6: Hadii ay tahay arrin gooni ah oo u baahan aqoon iyo waaya aragnimo dheeri ah taasi waxay u taalla dadka aqoonteeda leh waa tan Qur'kaanku sheegey, (فاسألوا أهل الذكر إن كنتم لا تعلمون)
7: Labada qeyb bood had ba kii dadku heshiis ku yihiin bey fiican tahay.

Hadaan ka dhigno in maanta waxgaradka kaliya ay wax doortaan dadqweynaha na banaanka laga joojiyo sidee kooxaha islaamigaa u arkaan waxgaradkeenna.
Aan fiirinno waxa kala haysta iyaga iyo Al.Shabaab.
Culimada Soomaaliyeed: Khaa'imiin diintoodi gatay.
Odoyaasha dhaqanka: Daaquudyo xeer sheydaan wax ku xukuma.
Aqoon yahanka: Jawaasiis gaalada u shaqeeya.
Maamulada ka jira dalka: Gaalo geesa waa weyn oo midab soomaaliyeed leh.
Intaas waa marka laga reebo kuwa iyaga taageersan ama aan fikir ahaan ka soo horjeedin.
Markaas waxaa muuqata in waxgarad iyo maxas aysan wax quman isdhaamin.

Muslimiintu markey madaxda dooranayaan waxay xaq u leeyihiin iney shuruud ku xiraan hadeey doortaan inuu u fulinayo sida axaadiista kusoo aroortay. (المسلمون علي شروطهم إلا شرطاً أحل حراما أو حرم حلالا.)
Sidoo kale muslimiintu markey beycada la galeen Cusmaan waxay ku xireen inuu raaco wadadii labadii khaliif ee ka horeeyey, Abubakar iyo Cumar RC.
Dadweynuhu ma aha waxmagarad meel iska fadhiya oo wixii la amro fuliya ee waa banii aadam leh caqli iyo fikir. Marka ay timaado cidda la dooranayo shacabku wey yaqaanaan cidda wanaagsan ee wax u qabaneysa, waayo waa arrin taabaneysa nolol maalmeedkooda.
Umudda muslimka ah ma doorato wax ka soo horjeeda diintooda ee waxaa diin iyo dad ba marin habaabiyey dulmi la diimeeyey.
Waxaana markhaati u ah waxa ka dhacay Masar, Tunis, Marocco iyo meela kale, markii shacabkii xorriyad la siiyey waan aragney ciddey doorteen, awal markey cabursanaayeenna dal iyo diin mid na ma dhaqneyn. Shucuubta muslimiinta maanta waxay u ooman yihiin dad wanaagsan oo diin iyo dalba waxtaraya oo ay doortaan. Hadii maanta la dooranayo ururadii islaamiga ahaa oo ay fahmeen in dadkoodu wax ka dhigi karaan horumar na aysan gaari karin la'aantood, kuwa Soomaaliya maxaa u diidey iney ku qancaan sanduuqyada codbixinta? Inkastoo badankooda ka kaarkoodii gubtey fursada badanna ay iska qasaariyeen oo Soomaalidu u jidbeysneyd hadana weli qaar baa shaatigu u dhaqan yahay.
Waxaa jira wadaado Al.Shabaab iskaga sannifay ee aan iyagu hayn wax badiil ah aragti ahaanna aan wax badan uga duwaneyn lamana yaqaan dowladda ay rabaan nooca ay tahay kaliya waxay u egtahay iney Shabaab oo wiilashoodii ahaa ay biyo hoostood iska arkeen .

Haddii shacabka Soomaaliyeed codkiisa xorriyad loo siin lahaa maanta uma dhexeeyeen wadaad Asia beyca looga soo qaaday iyo madaxweyne afrikaan ilaaliyo.
Caburinta iyo cagajugleynta waxaa ku caana maala wadaadada xanaaqsan iyo madaxda musuq maasuqaa dhexdoona waxaa ku qarsoomay codkii aqlabiyada aamusan haddase

waxay u muuqataa in halbeegyadii isbadeleen oo aqlabiyaddii ay madaxa lasoo kacday labadii qolana ay cidigtoodii cirka kasoo dhacday.
Beycada u hogaamiye kooxeed Soomaaliya jooga la galay urur caalami ah oo qaarado kale jooga waxaa fiicnaan lahayd inuu la galo Soomaalida, uuna iyaga u noqdo askari daacad ah.
Caqliyada ah in shacabka la shareysto oo aan la qiimeyn ama loogu yeero caamo dhagaweyn oo aan waxba kala ogeyn, ma aha mid u qalanta shacab muslim ah sida Soomlaada oo kale. Waxaa laga hadlayo waa aabaha, hooyadaa, walaalka, xaaskaaga IWM. Hadii kuwaas aysan wax ahayn adiguna waxba ma tihid, bulshadu waa mida kusoo saartay oo wax ku bartay oo kusoo barbaarisey adiga wadaadka. Waxaa wanaagsan in mujtamaca laga wada faa'iideysto awoodiisana la mideeyo, qofwalbana dhankuu ku fiican yahay lugu tixgeliyo arrintuna aysan noqon. (القافلة تسير والكلاب تنبح)
Mida kale danyarta iyo da'yartu waa dad wanaaga jecel taariikhiyan iyagaa rususha rimeyn jirey waayo waxay ahaayeen dhibanayaal cadaalad u baahan, halka dabaqada sare ay caan ku ahaayeen la dagaalanka anbiyada si ay u ilaashadaan danahooda gaarkaa.
Hadda waqtigan la joogo dhalliyaradu waa kuwa bulshada ugu isticmaalka badan internet-ka taasoo ka dhigtey kuwa ugu xog ogaalsan waxa aduunka ka socda saas darteed bey hadda dadka waa weyn dhallinyarada ka wareystaan meesha wax marayaan, Soomaaliduna hadda waaba wada siyaasi iyo suxufi miiran.

YAA LA DOORANAYAA?

Shakhsiyaad la yaqaan oo dalka u dhashay ayey dadku kala dooranayaan had ba kii danahooda fulinaya oo baahidooda daboolaya, waxaana lugu dooranayaa aqoon, karti, daacadnimo, amaano IWM.
Wax luguma doorto anaa koox hebla ah oo xaqa haya ama reer hebel ah oo dadka u sareeya.
Aan is dultaagno aayadaan.
(قال إجعلني علي خزائن الأرض إني حفيظ عليم.) سورة يوسف.
فال القرطبي "انه لم يقل إني حسيب كريم إنما قال إني حفيظ عليم فسألها بالحفظ والعلم لا بالنسب والجمال.)
Nebi Yuusuf CS wuxuu ahaa nebi wuxuu ahaa ninka dadka ugu qurux badan uguna nasab fiican dadkuu la joogeyna safiiyinkaas lama waagin, saa soo ay tahay dhammaan tilmaamahaas waxba kuma raadsan ee wuxuu gudbiyey C.V logic ah oo u qalma in shaqo lugu raadiyo. Waxaa kaloo aayada ka muuqata in qofku jago isu sharrixi karo ila fiiri.
(قال إبن كثير في شرح الآية, " مدح نفسه ويجوز للرجل دالك ادا جهل أمره." تفسير القرآن العظيم.
Waxaa muhiim ah in qofka lugu tixgeliyo takhasuskiisa loona dhiibo shaqo uu ka bixi karo. Nebigu CSW qaar saxaabada ka mid ah ayuu u diidey iney qabtaan jago siyaasadeed sida Abudar iyo C/raxmaan bin Samura wuxuuna u sheegey ineysan ka bixi karin.

Dowladda dadkuu doortaan iyo tan lugu khasbo.

Sababta doorashada loo sameeyey waa in dadka dareenkooda iyo danahooda la ilaaliyo hadaba sidee dadku u kala arkaan labadaas dowladood?

a) dowladda ku timaada rabitaankka shacabka, dadku waxay u arkaan dowlad ay iyagu leeyihiin diyaar na waxay u yihiin iney amarkeeda qaataan ayna difaacaan iyagoo ku qanacsan, tan kale waxay u arkaan musiibo kor kaga timid waa laga yaabaa iney cabsi la aamusaan muddo laakiin markeey arkaan iney jabtay waxay ula dhaqmaan sidii cadow gumeysi.

b) Dowlada dadku doorto waxay isu aragtaa shaqaale u adeega shacabka, halka tan kale ay shacabka u aragto adoomo ay iyadu leedahay sidii uu Qadaafi ugu jawaabey markey dadkiisu ku keceen.

c) Dowlada dadku doortaan waxay awoodaan iney la xisaab tamaan kalsoonidana kala noqdaan markey doonaan, tan kalena nin malagiis galay baa afka ku taaga.

d) Dowlada dadku doorteen waxay ogtahay iney xukunka ka tageyso saas darteed kursiga uma aragto wax lugu tashado ee waa waari meyside war hakaa haro, tan kalena waa madaxaa haku furto.

e) Markii ay jirto dowlad dadku doorteen shacabku hantida qaranka waxay u arkaan xoola ay iyagu leeyihiin, tan kalena waxay u arkaan xoolo kooxi leedahay.

f) Dowlada ay dadku doortaan wey yaqaanaan siyaasadda ay ku shaqeyso ee meesha wadanku u socdo, tan kalena qofkii warkaas keena waa jaajuus.

g)Dowlada la doorto, madaxda iyo shacabku wey siman yihiin saas darteed madaxweynaha haduu danbi galo maxkamad baa la geeynayaa, meesha maamulada taligood taliyayaasha ay ka sarreeyaan dhammaan shuruurcda iyo qawaaniinta ee shacabka uun maalin walba maxkamad lasoo taago.

Marka dowladeennu labadaas key noqon doonto waa su'aal taagan waxaan dhageystey muddo ka hor labo wareysi oo laga kala qaaday labada afhayeen ee Al.Shabaab iyo Ahlu sunna waljamaca waxaana mid walba gooni loo weydiiyey nooca ay tahay dowladey rabaan wadaadadaas jawaabaha ay bixiyeen waxaad moodaa niman caalam kale ku nool oo aan la socon duruufta ku xeeran iyo sanadka ay joogaan, marka iyaga iyo dadka ay leeyihiin waan xukumi rabna wey isu war la'yihiin.

Su'aal haddii maanta dadka jooga Kismaayo ama Baydhabo ay ku mudaharaadaan Al.Shabaab sida shucuubta kale maxay noqon kartaa jawaabta ay bixin lahayad xarakadu??? Maka duwanaan doontaa jawaabtii Qadaafi.

Ama reer Guriceel ku kacaan Ahlu sane oo dhahaan idin ma rabno maxay ku jawaabayaan?

Waxaa is xasuusin mudan in si kastoo loo caburiyo aysan cidna khasab yeelin.

Dad kuma hogaansamo waan ku dili sagaarana qoor qabad biyo kuma cabto.

Waxaan u baahanahay inaan soo nooleynno dhaqankii Nebiga CSW iyo saxaabada RC ee ahaa in qofka madaxdaa uu yahay adeega u shaqeeya shacabka ee uusan ahayn mulkiile isugu dadka iska leh.

Waxaa kaloo muhiim ah inaan isla meel dhigno ineysan jirin cid iyadu xaqa haysa ama ah afhayeenka samada. (إحتكار الحق.) oo aan tuurno kooxaysiga.(الطائفية.)iyo in danta dadweynaha laga hormariyo tan kooxda.

Waxaan kaloo u baahanahay inaan ogaanno in dowladnimadu ay isla badeleyso waqtiga, casri kastana ay dowladiisu ka duwanaan karto kii ka horeeyey, taariikhduna ay tahay taxane maalin ba meel joogta.

(إن الدولة الإسلامية تعيش في وسط مجتمع دولي متغير ومهمة العلوم السياسية- من منظور الإسلامي- بحث مساحات التقاطع وتحديد مناطق التمايز والإختلاف فالفقه القديم –حول سلطة ولي الأمر- يجب أن يوضع في سياقه التاريخي وتطوير نظرية وسياسة تدافع عن الأمة ولا تهمش دورها وتفعّل التمثيل السياسي لها ليكون أداة إدارة أفضل لا وسيلة بناء نخبة سياسية مستبدة وموالية للوضع القائم.) الجرار.

Mahadsanidiin dhammaan akhrisyaasha sharafta leh.

W/Q Abdihakim Diriye.
diiriye303@hotmail.com